

# Waraaqda Xaqiiqooyinka Xeerka Cuntada #18

Waxa loo baahan yahay in aad ka ogaa to Xeerka

WWW.HEALTHOREGON.ORG  
/FOODSAFETY

## OAR 333-150-0000, CUTUBKA 3-302.11(A) (1)(C)

(A) Cuntada waa in laga ilaaliyaa is wasakhaynta ayada oo: (1) Marka laga reebo sida ku cad (1) (c) hoose, laga sooco cuntada xayawaanka cayriinka ah inta lagu jiro kaydinta, diyaarinta, haynta, iyo soo bandhigidda: (a) Cuntada cayriinka ah ee u diyaarsan in la cuno oo ay kujirto cunto kale oo cayrii ah sida kalunka sushi ama xayawaanka badda ku nool ee qolofta leh ee molluscan, ama cuntada kale ee cayriinka ah ee diyaarka u ah in la cuno sida miraha darayga ah iyo quadaarta, <sup>p</sup> iyo (b) Cuntada la kariyay ee diyaarka u ah in la cuno; <sup>p</sup> (c) Cuntada xayawaanka ee cayriinka ah ee la qaboojiyay, loo diyaariiyay, laga ganacsado lana seejalay waxaa lala kaydin karaa ama lala soo bandhigti karaa ama korkeeda la saari karaa ayada oo barafaysan, cuntada in la cuno u diyaarsan ee ganacsi ahaan loo diyaariiyay lana seejalay.

## SABABAHA LA XIRII- RA CAAFIMAADKA BULSHADA:

Cuntooyinka xayawaanka ee cayriinka ah waa in la kala soocaa ayada oo lagu salaynayo isku xigxigitaanka heerkullada lagu kariyay maadaama heerkulada karintu sida ku cad § 3-401.11 ay ku salaysan yihiin xogta burburinta ee dabka iyo heerkal nooleyaasha la filayo. Tusaale ahaan, si looga hortago isugudbin-ta wasakhda, kalunka iyo doofaarka, kuwaas oo looga baahan yahay in la kariyo heerkul gaaraay 145°F ilaa 15 ilbiriqsi, waa in lagu kaydiyaa meel ka saraysa ama ka fog digaagga cayriinka ah, kaasoo loo baahan yahay in lagu kariyo heerkul gaaraay 165°F ilaa 15 ilbiriqsi ayada oo ay sabab u tahay heerkal nooleyaasha la filayo in ay kujiraan oo sareeyaa. Ka reebid aaya loo ogolyahay cuntada xayawaanka ee cayriinka ah ee la qaboojiyay, ganacsi ahaanna loo seejalay in lagu kaydiyo ama lagu soo bandhigo meel ku dhaggan ama ka saraysa cuntada la qaboojiyay, ganacsi ahaana loo seejalay ee cunista u diyaarsan.

## Ku kaydinta Cuntooyinka Xayawaanka Cayriinka ah Qaboojiyaha

Taariikh ahaan, goobaha shatiga haya-sta waxaa looga baahan yahay in cuntada xayawaanka ee cayriinka ah ay kala saaraan, sida hilibka lo'da, kalunka, digaagga iyo doofaarka oo ay sidoo kalena ka saaraan cuntooyinka kale ee u diyaarsan in la cuno ee ku jirta qaboojiyeyaasha iyo tallaagadaha waaweyn ee **qaboojinta** cuntada "walk-ins". Isbadal ku yimaada Shruucda Fayadhowrka Cuntada ayaa shardigaan sii gaarsiin doona qaybahaa qaboojinta sidaa si lamid ah, laakiin kaliya waa cuntooyinka xayawaanka cayriinka ah halkaasoo seejalaaddoodaa ganacsi ahaaneed la furay iyo/ama cuntada dib loo seejalay. Tan sab-abteedu waxa ay tahay cuntooyinka cayriinka ah ama diyaarka u ah in la cuno kuwaas oo lagu seejalay isla goobta waxay keenayaan khatar badan oo ku saabsan isu gudbinta wasakhda. Gacan ku haynta dheeraadka waxsoosaarka, dhexgalinta inta lagu jiro hanaanka qaboojinta, milmidda aan dhammaystirnayn ama seejalidda aan dhamayska tirneyn waxay kordhinyaan khatarta isugudbinta wasakhda ee ka imaanaya waxsoosaaradaan guriga lagu seejalay.

Si kastaba ha ahaatee, waxaa jirta ka reebid loo ogolyahay cuntada xayawaanka ee cayriinka ah ee la **qaboojiyay**, aan la furin ganacsi ahaanna loo seejalay in lagu kaydiyo ama lagu soo bandhigo meel ku dhaggan ama ka saraysa cuntada la qaboojiyay, ganacsi ahaanta loo seejalay ee cunista u diyaarsan.

Qalabka qaboojinta waa in loo habeeyaa loona diyaariyo si cuntada loogu hayo marxaladda qabowga ah. Talaabo sixitaan waa in la qaado haddii qaybta kaydka ama soo bandhigista ay korontadu ka tagto ama si kale u shaqayn waydo.

**Kaydiyaha Qaboojiyaha Taagan:**  
U kaydi baakatyada la furay ama hilibka iyo cuntada kale ee dib loo seejalay qaabkaan:

↓

MARFISHKA KORE  
Kaluunka, Hilibka jiirka ah,  
Hilibka doofaarka Haanbeegar-  
ka, Doofaarka jarjaran Digaagga,  
digaagga kale ee in la cuno u  
diyaarsan MARFISHKA HOOSE



*Hilibka, digaagga iyo cuntada badda cayriinka ah waxaa lala kaydin kara ama meel ka saraysa lagu kaydin karaa cuntooyinka in la cuno diyaarka u ah ee kujira qaboojiyaha haddii dhammaan waxyaabaha ganacsi ahaan loo diyaariiyay loona seejalay*

**Kaydiyaha Qaboojiyaha Jiifka ah:**  
Waa la aqbali karaa in la isticmaalo weelasha siman, aan wax nuugin, lana nadiifin karo si waxyaabaha loo kala saaro qaybta salka ah ee qaboojiyeyasha taagga ah iyo kuwa jiifka ah.